Shan Siyaaboodoo ad isu ilaalisid marka laguu shaqeeyo

1) Heshiisku qoraal ha ahaado

Sharciga gobolka BC caadiyan kaagama baahna inaad heshiis la saxiixatid shaqaalahaaga, haseyeeshee waxaa wanaagsan inaad la meel dhigtid qoraal ahaan waxaad ka filaysid shaqaalahaaga si aad uga badbaadid dhibaatooyin ama isfahan la'aan mustaqbalka.Tan waxaa loo yaqaan heshiiska shaqada (employment contract).

Hubi in dhammaan heshiisyadaada shaqadu ay waafaqsan yihiin **ugu yaraan** sharciyada an la dhaafi karin ee ku cad Xeerka Sharciga Shaqada gobolka BC (employment standards law). Haddii aadan sidaa yeelin, shaqaalahaagu waxay xaq u leeyihiin in ay helaan xuquuqaha an la dhaafi karin ee ku cad sharciga wixii la doonaa ha ku qornaadeen heshiiskaagee.

Tusaale ahaan, haddii heshiiskaagu sheegayo in qof kuu shaqeeya ad siinaysid $5 saacaddiiba, xeerka sharciga shaqada gobolka BC - na leeyahay in qofka shaqaalaha ahi xaq u leeyahay $8 saacaddiiba, ma aha oo kaliya in qofka kuu shaqeeyaa kugu leeyahay $3 saacaddii dheeraad ah hal saac oo kasta, balse lagugu ganaaxi karo inta u dhaxaysa $500 ilaa $10,000 xeer kasta oo ad jabisid.

Ganaaxu waa sii badanayaa mar kastoo shaqaaluhu kaaga guulaysto dacwad ay kugu soo oogeen in aadan sharciga raacayn. Haddii ad doonaysid in aad ka badbaadisid naftaada iyo shirkaddaadaba ganaaxyada sii cuslaanaya, waxaad u baahan tahay inaad ogaatid waajibaadkaaga sharci marka laguu shaqeeyo.

2) Xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga marka laguu shaqeeyo

Xuquuqda

Sida uu qabo sharciga gobolka BC, shaqaalahaagu waxay leeyihiin xuquuq gaar ah. Waxaana ka mid ah in ay helaan ugu yaraan mushaarka an laga hoosayn karin, xaq u leeyihiin waqti cunto, lacagta saacadaha dheeraadka ah, lacagta maalmaha ciidaha sharciga ah (paid statutory holidays), iyo in aysan shaqayn saacado xad dhaaf ah.

Badalka xuquuqdaas, waxaad kaga talagali kartaa in shaqaalahaagu ku imaanayaan shaqada waqtigeedii, shaqa wanaagsan qabtaan ayna fulin karaan shaqada ad doonaysid in ay qabtaan.

Waajibaadka

Sida sharcigu qabo waxaa waajib kugu ah in aad bixiso qaybtaada canshuuarta dakhliga, caymiska shaqo-la'aanta iyo hawl-gabka, iyo waliba diritaanka lacagaha ad uga jartay mushaarka shaqaalaha qaybtooda canshuurta dakhliga, caymiska shaqo-la'aanta iyo hawl-gabka. Mar kale, waxaad qaabilaysaa ganaaxyo lacageed oo culus haddii aadan fulin waajibaadkaaga. Si aad u badbaadisid naftaada iyo shirkaddaadaba, waa inaad ogaatid fulisaana waajibaadkaaga marka laguu shaqeeyo. **Sharcigoo adan aqoonin marmarsiinyo noqon maayo**. **(Ignorance of the law is no excuse.)**

Sida u qabo sharciga gobolka BC waxaad kaloo masuul ka tahay loo shaqeeye ahaan in aad siisid hay'adda WorkSafe BC (WorkSafe BC) lacagta caymiska dhaawacyada shaqaalahaaga ku gaari kara shaqada. Lacagtaas kama goyn kartid mushaarka shaqaalahaaga sababtoo ah waa masuuliyaddaada hantile ahaan inaad dhiibtid lacagahaas (fees) oo kale.

3) Mushaar bixinta

Mushaarooyinka

Haddii ad tahay loo shaqeeye gobolka BC, waa inaad shaqaalahaaga siisaa mushaarka an laga yarayn karin (minimum wage) ama ha ku shaqeeyaan saacad, bil ama komishinbee (commission).

Mushaarka ugu yari waa $8.00 saacaddii shaqaalaha badankooda, haseyeeshee waa kordhi karaa mustaqbalka. Haddii shaqaalahaagu shaqeeyaan in ka badan saacadihii caadiga ahaa, waxaa kugu waajib ah in aad siisid waxa loo yaqaan mushaarka saacadaha dheeraadka ah (overtime wages). Waa shaqadaada haddii ad tahay loo shaqeeye in aad la socotid saacadaha shaqaalahaagu shaqeeyaan. Haddii aadan doonayn in aad siiso mushaarooyinka saacadaha dheeraadka ah, waa inaad xaqiijisaa in aysan shaqayn wax ka badan saacadahoodii caadiga ahaa.

Sharciga gobolka BC wuxuu qabaa inaad shaqaalahaaga mushaarkooda siisid ugu yaraan laba jeer bishii. Waa inaad shaqaalahaaga siisaa dhammaan lacagtii ay shaqaysteen, oo ay ku jirto lacagaha saacadaha dheeraadkaa iyo maalmaha ciidda sharcigaa, 8 maalmood gudahood marka laga bilaabo dhammaadka xilliga mushaarka.

Waa inaad shaqaalahaaga lacagta ku siisaa doolarka Kanada. Shaqaalahaaga lacagta waxaad ku siin kartaa adoo toos ugu shubaya akawntigooda bangiga haddii ay ruqso qoraal ah ku siiyaan. Haddii ad ku siinaysid lacagta caddaan (cash) , hubi in ay saxiixaan warqadaha lacag qaadashada caddayn ahaan in ay kaa qaateen lacagtoodii.

Maalmaha Mushaarka

Mar kasta oo ad shaqaalahaaga lacagtooda siiso, waa inaad siisaa warqadda lacag bixinta (pay slip). Waa warqad muujinaysa lacagta ad siisay shaqaalahaaga, saacadaha ay shaqeeyeen maalin walba, lacagihii aad ka jartay, muddada fasaxa, iyo faahfaahimo kale.

Sharciga shaqada gobolka BC wuxuu kaa rabaa in aad u xafidid qoraaladaas shaqaalahaaga oo dhan ilaa 2 sano ka dib markay shaqada ka tagaan. Waxaa lagugu ganaaxi karaa inta u dhaxaysa $500 ilaa $10,000 haddii aadan xafidin qoraaladaas. Qoraaladaani waxay kaloo muhiim noqonayaan haddii qof shaqaale ahi u baahdo in loo faahfaahiyo mushaarkooda ama ku dacweeyo.

Lacagaha mushaarka laga jaro

Waxaa laguu ogol yahay in aad mushaarka shaqaalahaaga ka jarto lacagaha sharcigu u baahan yahay in laga jaro, sida canshuurta dakhliga, caymiska shaqo-la'aanta, iyo hawl-gabka. Wixii intaa dhaafsan - xataa lacagaha hormariska ama lacago si khalada loo siiyey - waa inaad marka hore ka hesho ogolaansho qoraal ah qofka shaqaalaha ah.

4) Ciidaha

Fasaxa iyo Lacagta Fasaxa

Ka dib 5 maalmood oo shaqaa, dhammaan shaqaalaha gobolka BC waxay xaq u leeyihiin fasax lacagtoodii u socoto. Haddii ad qof shaqaalayso 12 bilood, waa inaad siisaa ugu yaraan 2 asbuuc oo fasax ah iyo 3 asbuuc oo fasax ah ka dib markay shaqeeyaan 5 sano.

Dhammaan lacagta fasaxa ad siinaysidi waxay noqonaysaa 4% dhammaan mushaarka ay shaqaysteen oo an waxba laga jarin ee 5 ta sano ee ugu horreysa shaqada iyo 6% intaa wixii ka dambeeya.

Ciidaha Sharcigaa

Sanad walba waxaa ku jira 9 maalmood oo sharcigu dhigayo in shaqaalaha la fasaxo lacagtoodiina u socoto si ay ugu dabaaldagaan maalmahaas gaarka ah. Waxaana kuwaan loo yaqaan Maalmaha Ciidaha Sharcigaa (statutory holidays). Liiska magacyada maalmaha ciidaha sharcigaa, waxaad booqan kartaa rugta-saabka (website - ka) Waaxda Sharciyada Shaqada ah: www.labour.gov.bc.ca/esb/

Waa inaad shaqaalahaaga siisaa lacagta maalmaha ciidaha sharcigaa haddii ay shaqeeyeen saacada buuxa 15 ka mid ah 30 kii maalmood ee ka horreeyey maalinta ciidda. Haddii ad marka hore heshid ogolaanshaha shaqaalahaaga,

waxaad ka codsan kartaa in ay shaqeeyaan maalinta ciidda sharcigaa, badalkeedana ad maalin kale fasax siin kartaa.

Haddii maalinta ciidda sharciga ahi ku beeganto maalintii shaqaalahaagu caadiyan fasaxa ahaayeen, waa inaad maalin kale shaqada fasax ka siisaa. Tusaale ahaan, haddii qof shaqaale ahi caadiyan shaqada fasax ka yahay maalinta Isniintaa, maalinta ciidda sharciga ahina ku beeganto Isniin, waa inaad qofkaa siisaa maalin kaloo fasaxa oo lacagi u socoto oo wehelisa Isniinta.

Haddii aad u baahatid in shaqaalahaagu shaqeeyaan maalin ciidda sharcigaa, ayna ogolaadaan, waa inaad siisaa maalintaa lacag dheeraad ah oo loogu daray lacag maalmeedkii caadiga ahaa. Lacagta dheeraadkaa, loona yaqaan Lacagta Maalmaha Ciidaha Sharcigaa (Statutory Pay) waa mushaarkii caadiga ah ee shaqaalaha oo lagu dhuftay 1.5 dhammaan saacadihii uu shaqeeyey ilaa 12 saacadood. Taasoo macnaheedu yahay qof shaqaale ah oo ad caadiyan ku siisid $64 shaqo maalin caadiya, waa inaad u siisaa ugu yaraan $160 shaqada maalinta ciidda sharcigaa.

5) Sida qof shaqadiisa looga joojiyo

Fasaxyada Kooban

Sida uu qabo sharciga gobolka BC, ma diidi kartid codsiyada shaqaaluhu kugu weydiisanayaan fasax muddo macquul ah sabab xanuun awgeed, uur, iyo kadiso qoys (xanuun halisa ama dhimasho xubin qoyskaa). Waa inaad shaqadooda u sii haysaa haddii ay go'aansadaan in ay soo noqdaan.

Shaqa ka Joojin

Waxaad xaq u leedahay inaad shaqada ka joojiso shaqaalahaaga markaad doontid. Haseyeeshee, waa inaad sii siisaa ogeysiin qoraal ah. Kan waxaa loo yaqaanaa Ogeysiiska Shaqa ka Joojinta (Notice of Termination). Mudada ogeysiiska la sii siinayaa waxay ku xiran tahay inta qofkaasi kuu shaqaynayey. Tusaale ahaan, haddii qofku kuu shaqaynayey in ka badan 12 bilood, waa inaad siisaa 2 asbuuc oo ogeysiisa. Haddii uu kuu shaqeeyey in ka badan 5 sano, waa inaad siisaa 5 asbuuc oo ogeysiisa.

Waxaad kaloo shaqaalaha cayrin kartaa adoon siin wax ogeysiisa, haseyeeshee waa inaad markaa qadar lacaga u siisaa magdhaw wixii ka baaqday. Kan waxaa loo yaqaanaa magdhaw (compensation). Sida ogeysiintii qadarka lacagta magdhawga aad bixinaysaa waxay ku xiran yahay inta ay le'eg tahay mudada ay kuu shaqaynayeen. Waxaa ogeysiinta iyo magdhawga ka soo hara haddii ad qof shaqaale ah ku cayrisid "sabab xaq ah" ("just cause") markuu fal aad u xun goobta shaqada ka gaysto, sida xatooyo, shaqaale kale u gacan-qaado ama hantida shirkadda si ula kac ah u waxyeeleeyo. Haddii ad sidaa go'aansatid, waa inaad qofka kuu shaqeeya ku siisaa dhammaan

mushaarada kugu baaqigaa 48 saac gudahood laga bilaabo waqtiga ad cayriso.

Sida ay qabaan shuruucda shaqada gobolka BC, shaqaaluhu way iskaga tagi karaan shaqada ayagoo an ogeysiis sii siin qofka ay u shaqeeyaan, haddii aysan horay isugu ogeyn heshiiska shaqada in ay ogeysiis bixiyaan. Haddii qof shaqaale ahi shaqada iskaga tago, waxaad haysataa 6 maalmood in aad ku siisid mushaarkooda ugu dambeeya.

Shuruucda shaqada gobolka BC waa ka dhib badan yihiin in dhammaantood lagu faahfaahiyo qoraalkaan. Waxaa waajib kugu ah marka laguu shaqeeyo xaqiijinta habsami ugu dhaqanka shuruucda dhammaantood. Si aad wax uga sii ogaatid, booqo rugta-saabka (website - ka) Waaxda Sharciga Shaqada ah: http://www.labour.gov.bc.ca/esb/.

Rugta-saabkoodu (website-koodu) wuxuu ku siinayaa macluumaad dheeraad ah oo la xiriira Xeerka Sharciga Shaqada gobolka BC. Rugta-saabkoodu waxaa kaloo u leeyahay macluumaad ku qoran afaf kale. Haddii aadan akhriyi karin afafkaas midkoodna, weydiiso saaxiibkaa ama hawlwadeenka dajintu in uu kuu macneeyo macluumaadka.

Immigrant PLEI Consortium

Mashruucaan waxaa lagu suurtagaliyey maalgalinta Dawladda Dhexe ee Kanada iyo Gobolka Biritish Kolombiya.